


Soo Koobida Qorshaha Istraatiijiga ah ee Caafimaadka Dadweynaha - Seattle & King County 2024-2029



Public Health
Seattle & King County



Warqad ka timid Agaasimaha

Waan ogahay waxaad ku fekereyso: Qorshe kale oo istiraatiiji oo caajis ah. Fadlan i rumayso markaan idhaahdo kani maaha qorshahaaga istiraatijiyadeed ee caadiga ah.

Mid ka mid ah, si fudud kuma taxnayn waxa aanu samayno: dhammaan hawlaha muhiimka ah ee ay waaxdeenu qabato maalin kasta. Waxaa jira kuwo aad u badan oo la tixi karo, xaalad kasta, waxaan dooraneynaa inaan wax u sameyno si kiihore ka duwan.

Ma yaaban tahay? Wacan.

Aad ayaan ugu faraxsanahay inaan kula wadaago qorshaha cusub ee Caafimaadka Dadweynaha. Qorshahan cusub, waxaan wax u qabanaynaa si kiihore ka duwan. Waxaan ku bilaabaynaa in aan diirada saarno sababta aan u qabano shaqadeena - wax ka qabashada Cunsuranimada una aqoosanayna dhibaataada caafimaadka dadweynaha - iyo sida aan u qaban doono shaqadeena - anago udub dhexaad uga dhigayna ka hortaga midab-takoorka, sinnaanta caafimaadka, wanaagga xoogga/cudduda shaqaalaha, iyo iskaashi. Sababta iyo sida loo hagi doono sida aan wax uga qabano qaar ka mid ah arrimaha caafimaadka ee ugu daran waqtigeena - waxa ku jira qorshahan.


Habkani wuxuu noo diyaarinayaa inaan diyaar u noqono wax kasta. Waxaan rumaysanahay in waxa si joogto ah uga soo baxa caafimaadka dadweynaha: Cabsidii hore oo dib u soo baxa, kuwo cusubna ay soo baxaan. Haddii aan ku heshiinno sababta iyo sida, waxaan la macaamili karnaa wax kasta oo nagu soo fool leh.

Caafimaadka Dadweynaha - Seattle iyo King County waxay ka gudbayaan xaalad degdeg ah oo sannado badan jirtay oo ku saabsan Aafada COVID-19, taas oo sinnaan la'aanta jinsiyadeed ay ahayd caqabadayada ugu weyn. Faafida COVID-19 waxay ku abuurtay dhaawac iyo gubasho ka dhex dhacda shaqaalaheenna waxayna ku khasabtay waaxdeenna, iyo waaxyaha caafimaadka dadweynaha ee qaranka oo dhan, inay si aasaasi ah dib uga fikiraan sida aan u qabanno shaqadeena.



Dr. Faisal Khan, Director of Public Health –Seattle & King County

Anago wada jirna mustaqbalka, Caafimaadka Dadweynuhu waxa ay ku faraxsan yihiin in aan idin la wadaagno qorshaheenna istaraatiijiyadeed ee 2024-2029, kaas oo ku dhismaya casharradii laga bartay masiibada COVID-19, oo ay ku jiraan codadka bulshada iyo shaqaalaha, oo dejinaya waddada lixda sano ee soo socota ee waaxdayada. In kasta oo ciribtirka kala duwanaanshiyaha caafimaadka ay muddo dheer ka mid ahayd shaqada aasaasiga ah ee Caafimaadka Dadweynaha, waxaan si ula kac ah ugu dadaalnay inaan horumarino qorshahan annagoo adeegsanayna habka ka hortagga Cunsuriyada, qorshaha laftiisana wuxuu ku dhex jiraa ka-hortagga cunsuriyadda iyo sinnaanta jinsiyadaha oo dhan.



Dr. Faisal Khan, Director of Public Health – Seattle & King County



Soo koobida Fulinta

Caafimaadka Dadweynaha - Qorshaha istaraatiijiyadeed ee Seattle iyo King County 2024-2029 waxa uu qeexayaa sida aan uga hortagi doono caqabadaha caafimaad ee ugu joogtaysan uguna degdega badan ee soo food saara Degmada King.

Arrimaha caafimaadka ee wajahaya dadka degmada King waa kuwo muhiim ah. Arrimahan qalafsan waa in ay wax ka qabtaan waaxyo badan iyo hawl-wadaagayaal wada shaqaynaya. Qorshahani waxa uu qeexayaa sida Caafimaadka Dadweynuhu (Public Health) diiradda u saari doono hawlaha iyo agabka waaxda si wax looga qabto khataraha caafimaadka bulshada. Qorshaha istaraatiijiyadeed wuxuu sidoo kale ku hagi doonaa Caafimaadka Dadweynaha xoojinta awoodda gudaha iyo kaabayaasha siyaabaha taageeraya dhammaan barnaamijyada waaxda oo dhan si loo daboolo baahiyaha caafimaadka dadweynaha.

Inta lagu guda jiray horumarinta qorshahan, ku dhawaad 100 ka mid ah shuraakadayada bulshada iyo nidaamka caafimaadka dadweynaha, iyo sidoo kale shaqaalaha waaxda oo dhan, ayaa bixiyay faallooyin ku saabsan qorshahan fadhigada dhegeysiga iyo waraysiyada. Deyrtii 2023, waxaanu qabanay taxane wada sheekaysi Qorshayn Istaraatiiji ah, kaas oo shaqaaluhu ay ka barbar shaqaynayaan la-hawlgalayaasha bulshada si ay u isticmaalaan jawaab celintan aasaaska si wada jir ah loogu horumariyo aragtida cusub ee Caafimaadka Dadweynaha, hadafka, qiyamka, iyo mudnaanta:

ARAGTIDA

Caafimaadka, fayoobaanta, iyo sinnaanta jinsiyadda - maalin kasta qof kasta oo ku nool Degmada King.

HIMILADA

Si kor loogu qaado oo loo horumariyo caafimaadka iyo fayo-qabka dhammaan dadka ku nool Degmada King iyadoo lagu hoggaaminayo sinnaanta jinsiyadda iyo beddelidda nidaamyada iyo qaababka saameeya caafimaadka.

QIIMAHA

Sinnaanta, hogaaminta, iskaashiga, iskaashiga bulshada, la xisaabtanka, iyo ka shaqaynta kor u kaca si wax looga qabto go'aamiyayaasha bulshada ee caafimaadka iyo sababaha asaasiga ah ee sinnaan la'aanta caafimaadka.

Meelaha mudnaanta leh



Caafimaadka Dadweynuhu wuxu iskugu jira hayado badan oo ka kooban federaalka, gobolka, iyo ilaha maalgelinta maxalliga ah, oo ay ku jiraan deeqaha. Hirgelinta guusha leh ee hawlo badan oo lagu qeexay qorshahan istiraatiijiyadeed waxay ku xiran tahay is waafajinta kheyraadka jira ama aqoonsiga kheyraadka iyo iskaashiga cusub. Caafimaadka Dadweynuhu waxa uu ku talo jiraa in uu si firfircoon u raadiyo agabkan iyo adeegsiga qorshahan si aanu ugu wargelinno maalgelinta istiraatiijiyadeed ee waaxdeenna inta aan sii wadno safarkayaga ku aaddan noqoshada waaxda caafimaadka ee caddaaladda ku dhisan.

Si aad maclumaad badan u heshid, fadlan eeg warbixintayada dhamaystiran ee laga heli karo kingcounty.gov/health/strategicplan

XIDHIIDHKA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Telafoon: 206-296-4600

iimayl: publichealth@kingcounty.gov

Web: kingcounty.gov/health

Blog: publichealthinsider.com



Public Health 
Seattle & King County

Qaabab kale waa diyaar.
wac 206-263-8870 ama TTY: 711.

